يَحْكُمُ لَا مُعَقِّبَ لِحُكْمِهِۦ ۚ وَهُوَ سَرِيعُ
ٱلْحِسَابِ ﴿٤١﴾

xukumi, wax burinna ma jiro xukunkiisa, waana midkay deg deg tahay xisaabtiisu.

وَقَدْ مَكَرَ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِهِمْ فَلِلَّهِ ٱلْمَكْرُ جَمِيعًا ۖ
يَعْلَمُ مَا تَكْسِبُ كُلُّ نَفْسٍ ۗ وَسَيَعْلَمُ ٱلْكُفَّٰرُ
لِمَنْ عُقْبَى ٱلدَّارِ ﴿٤٢﴾

42. waxaa wax dhagray kuwii ka horreeyey Eebaase abaal maris (Dhagar) iska leh dhammaan, wuxuuna ogyahay waxay kasban naf kasto, waxayna ogaan Gaaladu cidday u ahaato cidhib fiican.

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ لَسْتَ مُرْسَلًا ۚ قُلْ
كَفَىٰ بِٱللَّهِ شَهِيدًۢا بَيْنِى وَبَيْنَكُمْ
وَمَنْ عِندَهُۥ عِلْمُ ٱلْكِتَٰبِ ﴿٤٣﴾

43. waxayna dhihi kuwii Gaaloobay ma tihid Rasuul, waxaad dhahdaa waxaa marag ugu filan dhexdeenna Eebe iyo cidda agteed ogaanshaha Kitaabku yahay.

(Nabiga Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) dhib ma saarra hadduu Eebe Ciqaabo Gaalada intuu Nabigu Noolyahayna waa wanaag, hadduu ka hor Oofsadana waxaa uun Nabiga Saaran Gaadhsiin, Eebana Xisaabtooda, Wuuna u gargaaray Eebe Rasuulkiisa, Gaaladiina jabiyey isagoo Nool, waxaana u muuqatay in Dhulka Darfaha laga soo Nusqaaminayey oo Islaamku ka adkaanayey Gaalnimada, Xukunkana Eebaa iska leh, wax xukunkiisa ka daba hadli karana ma jiro, xisaabtiisuna way deg degtaa, dhagarna waa shaqada Gaalada ama ha horreeyeen ama ha dambeeyeene, Eebaase dhammaan abaal marin iska leh oo ka jaasiin, Gaalana mar umbay ogaan cidda cidhibta fiican u hadho, waxayba ku af adeygeen inay Nabiga Beeniyaan kuna dhahaan ma tihid Rasuul, maxaase looga baahanyahay maraggooda, waxaa marag ugu filan Eebihiis iyo ciddii Cilmi leh oo rumeysan Nabiga oo Ehelu Kitaabkii ah.
Suuradduna waxay ku dhamaatay Dhagarta gaalada xumideeda, in xaqu sarreyn, in cidhib fiican Muslimiintu heli, in Rasuullada Eebe soo diray maragna ugu filanyahay. Ar- Racd (40-43).

# Suurat Ibraahiim

# سورة إبراهيم

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo mid gaaraba Naxariista.

الٓر ۚ كِتَٰبٌ أَنزَلْنَٰهُ إِلَيْكَ لِتُخْرِجَ ٱلنَّاسَ
مِنَ ٱلظُّلُمَٰتِ إِلَى ٱلنُّورِ بِإِذْنِ رَبِّهِمْ إِلَىٰ صِرَٰطِ
ٱلْعَزِيزِ ٱلْحَمِيدِ ﴿١﴾

1. xarfaha hore oo kale waa la soo sheegay macnahooda, kanna waa Kitaab aannu kugu soo dejinnay inaad kaga bixisid dadka mugdiyada xagga Nuur idamka Eebehood iyo jidka Eebaha adkaada ee la Mahadiyo.

ٱللَّهِ ٱلَّذِى لَهُۥ مَا فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَمَا فِى ٱلْأَرْضِ ۗ
وَوَيْلٌ لِّلْكَٰفِرِينَ مِنْ عَذَابٍ شَدِيدٍ ﴿٢﴾

2. Ilaaha iska leh waxa Samooyinka iyo Dhulka ku sugan, halaagna waxaa mudan Gaalada cadaab daran xaggiis.

3. oo ah kuwa ka jecel nolosha adduun Aakhiro oo ka leexiya (Dadka) Jidka Eebe lana dooni Qallooc, kuwaasuna waxay ku suganyihiin Baadi fog.

4. Rasuul kuma dirro waxaan Afka Qoomkiisa ahayn si uu ugu caddeeyo, wuuna baadiyeeyaa Eebe cidduu doono inta xaqa loo caddeeyey ka dib, wuuna hanuunin cidduu doono, waana adkaade falsan.

ٱلَّذِينَ يَسْتَحِبُّونَ ٱلْحَيَوٰةَ ٱلدُّنْيَا عَلَى ٱلْـَٔاخِرَةِ
وَيَصُدُّونَ عَن سَبِيلِ ٱللَّهِ وَيَبْغُونَهَا عِوَجًا
أُوْلَٰٓئِكَ فِي ضَلَٰلٍ بَعِيدٍ ٣
وَمَآ أَرْسَلْنَا مِن رَّسُولٍ إِلَّا بِلِسَانِ قَوْمِهِۦ
لِيُبَيِّنَ لَهُمْ فَيُضِلُّ ٱللَّهُ مَن يَشَآءُ وَيَهْدِي
مَن يَشَآءُ وَهُوَ ٱلْعَزِيزُ ٱلْحَكِيمُ ٤

**Quraanka Eebaa ku soo dejiyey Nabiga Muxameda (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu dadka mugdiga iyo jahliga kaga saaro oo Nuur iyo jidka toosan ee Ilaahay u saaro, illeen Eebaa Awood lehe, lana mahdiya, lehna Cirka iyo Dhulka waxa ku sugane, halaag iyo ciqaabna waxaa mudan gaalada Adduun ka doortay Aakhiro oo Jidka Eebe Dadka ka leexiya doonina Qalloociisa iyo xumaantiisa, kuwaasuna waa kuwa baadi fog ku sugan, xigmada Ilaahayna waxay keentay in Rasuul kasta lagu bixiyo Afka Qoomkiisa si marka hore iyaga loo gaadhsiiyo markaas u faafto Diintu, mana keenin xigmada Eebe in Afkasta lagu diro maxaa yeelay Afafku way badanyihiin, Saasaana Nabigeenii loogu Bixiyey Luuqada Carabiga oo cidkastoo Muslima iyo Caalamkaba laga rabo inuu barto.**
**Rasulkana waxaa saaran u caddeyn xaqa, Dadkana waxaa saaran rumeyn, Eebana wuu xisaabin cid kasta waxay beeratay Khayr iyo Shar.** Ibraahiim (1-4).

---

5. waxaan la dirray (Nabi) Muuse Aayaadkannaga bixi Qoookaaga Mugdiyada xagga Nuurka, kuna waani «xusuusi» Nicmooyinkii Ilaahay arrintaasna Aayaadbaa (Calaamooyin) ugu sugan samir badane, shugri badan dhammaantiis.

وَلَقَدْ أَرْسَلْنَا مُوسَىٰ بِـَٔايَٰتِنَآ
أَنْ أَخْرِجْ قَوْمَكَ مِنَ ٱلظُّلُمَٰتِ
إِلَى ٱلنُّورِ وَذَكِّرْهُم بِأَيَّىٰمِ ٱللَّهِ إِنَّ
فِي ذَٰلِكَ لَأَيَٰتٍ لِّكُلِّ صَبَّارٍ شَكُورٍ ٥

6. iyo markuu Nabi Muuse ku yidhi Qoomkiisa xusuusta Nicmada Eebe korkiinna markuu idinka koriyey Colkii Fircoon iyagoo idin dhadhansiin cadaab (Daran) Xun oo gawrici Wilashiinna oo dayn Gabdhihiinna (Dullaysi) arrintaasna waxaa ku sugnayd Balaayo (Imtixaam) Eebihiin oo wayn.

وَإِذْ قَالَ مُوسَىٰ لِقَوْمِهِ ٱذْكُرُواْ نِعْمَةَ ٱللَّهِ
عَلَيْكُمْ إِذْ أَنجَىٰكُم مِّنْ ءَالِ فِرْعَوْنَ
يَسُومُونَكُمْ سُوٓءَ ٱلْعَذَابِ وَيُذَبِّحُونَ أَبْنَآءَكُمْ
وَيَسْتَحْيُونَ نِسَآءَكُمْ وَفِي ذَٰلِكُم
بَلَآءٌ مِّن رَّبِّكُمْ عَظِيمٌ ٦

7. iyo markuu Eebehiin ogaysiiyey haddaad shugridaan waan idiin kordhin, haddaad gaalowdaanna cadaabkaygu waa daranyahay.

وَإِذْ تَأَذَّنَ رَبُّكُمْ لَئِن شَكَرْتُمْ
لَأَزِيدَنَّكُمْ وَلَئِن كَفَرْتُمْ إِنَّ عَذَابِي
لَشَدِيدٌ ٧

8. wuxuuna yidhi (Nabi) Muuse haddaad Gaalowdaan idinka iyo waxa ku sugan Dhulka dhammaan Eebe waa Hodan mahadsan.

وَقَالَ مُوسَىٰٓ إِن تَكْفُرُوٓا۟ أَنتُمْ وَمَن فِى ٱلْأَرْضِ جَمِيعًا
فَإِنَّ ٱللَّهَ لَغَنِىٌّ حَمِيدٌ ﴿٨﴾

Eebe wuxuu la diray Nabi Muuse Sagaal Mucjiso si uu Qoomkiisa mugdiga uga saaro Nuurkana u tusiyo, kuna wacdiyo isagoo xusuusin Nicmooyinkii Eebe, waana arrin calaamo u ah ciddii samir iyo shugri badan. Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Amarka Mu'minku waa la yaab, wax kastoo Eebe u keeno waa u khayr, dhib hadduu ku dhaco wuu ku samraa Khayrbayna u noqotaa, haddii wanaag soo gaadhana wuu ku shugriyaa Khayrna way u noqotaa.« Waa xadiith saxiixa». Nabi Muusana wuxuu xusuusiyey Qoomkiisii sida Eebe ugu Nicmeeyey ugana koriyey Fircoonkii dullaystay ee Wiilasha laynaayey Gabdhahana dullaysanayey, waxayna ahayd Imtixaam wayn, Eebana wuxuu dadka ogaysiiyey in Ciddii ku shugridana uu u kordhin Nicmada, tii ka gaalowdana cadaabka Eebe daranyahay, dhammaan hadday dadku gaaloobaanna Eebe waa Hodan Mahadsan, umana baahna taakulayn iyo gacansiin, waxaase kaalmo u baahan miskiinkaa dadka ah ee haddana markuu ladanyahay wax isbidi. Ibraahiim (5-8).

---

9. miyuuna idin soo gaadhin warkii kuwii idinka horreeyey (oo ah) Qoomkii Nabi Nuux, Caad, Thamuud, iyo kuwii ka dambeeyey, ma oga (Tiradooda) Eebe mooyee, waxayna ula yimaadeen Rasuuladoodii xujooyin waxayna ku celiyeen Gacmahooda Afkooda (Way beeniyeen) waxayna dhaheen anagu waan ka gaalownay waxa laydinku soo diray annaguna shakibaan kaga sugannahay waxaad noogu yeedhaysaan xaggiisa oo daran.

أَلَمْ يَأْتِكُمْ نَبَؤُا۟ ٱلَّذِينَ مِن قَبْلِكُمْ قَوْمِ نُوحٍ
وَعَادٍ وَثَمُودَ وَٱلَّذِينَ مِنۢ بَعْدِهِمْ
لَا يَعْلَمُهُمْ إِلَّا ٱللَّهُ جَآءَتْهُمْ رُسُلُهُم بِٱلْبَيِّنَٰتِ
فَرَدُّوٓا۟ أَيْدِيَهُمْ فِىٓ أَفْوَٰهِهِمْ وَقَالُوٓا۟ إِنَّا كَفَرْنَا
بِمَآ أُرْسِلْتُم بِهِۦ وَإِنَّا لَفِى شَكٍّ مِّمَّا تَدْعُونَنَآ
إِلَيْهِ مُرِيبٍ ﴿٩﴾

10. waxay dheheen Rasuuladoodii ma Eebaa shaki ku jiraa ee abuuray Samooyinka iyo Dhulka idiinkuna yeedhi inuu idinka dhaafo dambiyadiinna dibna idiin dhigo tan iyo muddo magacaaban, waxayna dheheen idinku ma tihiin waxaan bashar (Dad) nala mida ahayn, waxaadna doonaysaan inaad naga leexisaan waxay caabudi jireen Aabbayaalkanno noo keena xujo cad.

۞ قَالَتْ رُسُلُهُمْ أَفِى ٱللَّهِ شَكٌّ فَاطِرِ
ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ يَدْعُوكُمْ لِيَغْفِرَ لَكُم
مِّن ذُنُوبِكُمْ وَيُؤَخِّرَكُمْ إِلَىٰٓ أَجَلٍ
مُّسَمًّى قَالُوٓا۟ إِنْ أَنتُمْ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُنَا تُرِيدُونَ
أَن تَصُدُّونَا عَمَّا كَانَ يَعْبُدُ ءَابَآؤُنَا فَأْتُونَا
بِسُلْطَٰنٍ مُّبِينٍ ﴿١٠﴾

11. Rasuulladii waxay dheheen anagu ma nihin waxaan dad idin la mida ahayn, Eebaase ku mannaysta (khayr) cidduu doono oo addoomadiisa ka mida, xujana idiinma keeni karro idinka Eebe mooyee, Eebe uunna ha tala saarteen Mu'miniintu.

قَالَتْ لَهُمْ رُسُلُهُمْ إِن نَّحْنُ إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ
وَلَٰكِنَّ ٱللَّهَ يَمُنُّ عَلَىٰ مَن يَشَآءُ مِنْ عِبَادِهِۦ
وَمَا كَانَ لَنَآ أَن نَّأْتِيَكُم بِسُلْطَٰنٍ إِلَّا بِإِذْنِ
ٱللَّهِ وَعَلَى ٱللَّهِ فَلْيَتَوَكَّلِ ٱلْمُؤْمِنُونَ ﴿١١﴾

12. maxaanaan u talo saaranayn Eebe isagoo nagu hanuuniyey Jidkannaga, waana ku samraynaa waxaad nagu dhibaysaan Eebe uun ha talo saarteen kuwa talosaaran (Cid).

وَمَا لَنَآ أَلَّا نَتَوَكَّلَ عَلَى ٱللَّهِ وَقَدۡ هَدَىٰنَا
سُبُلَنَاۚ وَلَنَصۡبِرَنَّ عَلَىٰ مَآ ءَاذَيۡتُمُونَاۚ وَعَلَى ٱللَّهِ
فَلۡيَتَوَكَّلِ ٱلۡمُتَوَكِّلُونَ ١٢

Wax badan yuu Eebe ka warramay ummadihii hore iyo waxa ku dhacay si loogu waano qaato, wayna badnaayeen, Nabiyadii iyo Xaqiina waydiideen, iyagoo shakiyey xaqa, Rasuuladuse waxay u sheegeen inaan Eebe iyo xaqu shaki lahayn, see loo shakin Eebaha Cirka iyo Dhulka iyo wax kasta oo khalqi ah Abuuray, runtii waxaa shakin Eebe iyo Abuurkiisa gaalada liita ee jecel inay xumaanta dabaashaan si aan waxna u celin, Eebe dadka wuxuu ugu yeedhi dambi dhaaf, wuxuuna u yeelay waqti magacaaban, mana haboona in gaaladu xujaystaan in Nabiyadu dad la mida yihiin kana leexin waxay Aabbayaalkood caabudi jireen, Rasuuladuse waa dad Eebaase ku mannaystay waxyi iyo suubanaan, waxay la imaan karaanna ma jiro idin Eebe la'aan tiis, Eebaana cid la talo saarto ah, Mu'miniinta iyo Rasuuladuna isagay talo saartaan illeen isagaa hanuuniyey jidka toosanna ku tusiyey, waana in lagu samro oo loo adkaysto dhibka xaqa dartiis kugu gaadhi adoo isku dayi inaad si fiican isaga reebtid,Eebayna Mu'miniintu talo saartaan. wakaas xaqii iyo wanaagii,maxayse hayaan gaalada xaqa diidaysa ee Beenaalayaasha ah waxba. Ibraahiim (9-12).

---

13. waxay ku dheheen kuwii gaaloobay Rasuulladoodii waxaynu idinka bixin dhulkannaga ama waxaad ku soo noqonaysaan (soo galaysaan) diintannada, wuxuuna u waxyooday Eebahood inuu halaago daalimiinta.

وَقَالَ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ لِرُسُلِهِمۡ لَنُخۡرِجَنَّكُم
مِّنۡ أَرۡضِنَآ أَوۡ لَتَعُودُنَّ فِي مِلَّتِنَاۖ فَأَوۡحَىٰٓ إِلَيۡهِمۡ
رَبُّهُمۡ لَنُهۡلِكَنَّ ٱلظَّٰلِمِينَ ١٣

14. dajinna idinka dhulka kuwaas ka dib, arrintaasna waxaa heli ciddii ka cabsata la kulankayga oo ka cabsata gooddigayga.

وَلَنُسۡكِنَنَّكُمُ ٱلۡأَرۡضَ مِنۢ بَعۡدِهِمۡۚ
ذَٰلِكَ لِمَنۡ خَافَ مَقَامِي وَخَافَ وَعِيدِ ١٤

15. wayna gargaar dalbeen waxaana khasaaray kibir badane madax adag dhammaantiis (xaq diid)

وَٱسۡتَفۡتَحُواْ وَخَابَ كُلُّ جَبَّارٍ عَنِيدٖ ١٥

16. waxaana ka horraysa jahannamo waxaana laga waraabin Biyo carow ah (Dhaacaanka Ehelu Naarka).

مِّن وَرَآئِهِۦ جَهَنَّمُ وَيُسۡقَىٰ مِن مَّآءٖ صَدِيدٖ ١٦

17. wuuna ku margan mana ka degayo wuuna uga imaan Mawdku (Geeridu) meel kasta, mana dhimanayo, gadaashiisna waxaa ah cadaab adag.

يَتَجَرَّعُهُۥ وَلَا يَكَادُ يُسِيغُهُۥ وَيَأۡتِيهِ
ٱلۡمَوۡتُ مِن كُلِّ مَكَانٖ وَمَا هُوَ بِمَيِّتٖۖ
وَمِن وَرَآئِهِۦ عَذَابٌ غَلِيظٞ ١٧

18. kuwa ka gaaloobay Eebahood wuxuu la midyahay camalkoodu dambas ku darraatay «ku dhacday» dabayli maalin dabayl dhabasho daran, kama

مَّثَلُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ بِرَبِّهِمۡۖ أَعۡمَٰلُهُمۡ كَرَمَادٍ
ٱشۡتَدَّتۡ بِهِ ٱلرِّيحُ فِي يَوۡمٍ عَاصِفٖۖ لَّا يَقۡدِرُونَ

مِمَّا كَسَبُوا۟ عَلَىٰ شَىْءٍ ۚ ذَٰلِكَ
هُوَ ٱلضَّلَـٰلُ ٱلْبَعِيدُ ﴿١٨﴾

karaan (helaan) waxay Kasbadeen waxba, kaasina waa baadida fog uun.

Siday caadada gaaladu tahay had iyo jeer waxay ku haddidijireen Rasuulladii inay dhulkooda ka eryi ama ay soo geli Diintooda, waxaad moodaa inay dhulka iyaga kaliya leeyihiin dhabtuna waa in dhulka Eebe leeyahay ugana raalli yahay inay ku noolaato ciddii cadaalad iyo Islaanimo ku fulin oyan gaaladu lahayn say sheegi, daalin waa la halaagi waxaana u hadhi dhulka Ciddii Eebe ka yaabta, Rasuulladii iyo gaaladuba way gargaar warsadeen,waxaase khasaari ciddii kibir badan oo xaqa iskala wayn Galina cadaab daran oon geeri iyo nolol midna ahayn, gaalada camalkeeduna waa sida dambas dabaylu qaadday oo waxba kama helaan, waxayna ku suganyihiin Baadi fog. Waxaa Abii umaamo laga wariyey in Nabigu Yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) in Biyo Naareed loo soo dhawayn gaalka oo uu nici wajiga iyo madaxana ka gubi markuu cabbana Xiidmuhu soo daadan.
Waxaa sheegay Imaam Axmed. Eebe ha naga koriyo Naarta. Camalbaase loo baahanyahay.
Ibraahiim (13-18).

---

أَلَمْ تَرَ أَنَّ ٱللَّهَ خَلَقَ ٱلسَّمَـٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ
بِٱلْحَقِّ ۚ إِن يَشَأْ يُذْهِبْكُمْ وَيَأْتِ بِخَلْقٍ جَدِيدٍ ﴿١٩﴾

19. miyeydaan arkayn in Eebe u abuuray Samooyinka iyo dhulka xaq, hadduu doonana idin tagsiin karo lana imaan karo khalqi cusub.

وَمَا ذَٰلِكَ عَلَى ٱللَّهِ بِعَزِيزٍ ﴿٢٠﴾

20. arrintaasina Eebe kuma adka.

وَبَرَزُوا۟ لِلَّهِ جَمِيعًا فَقَالَ ٱلضُّعَفَـٰٓؤُا۟ لِلَّذِينَ
ٱسْتَكْبَرُوٓا۟ إِنَّا كُنَّا لَكُمْ تَبَعًا فَهَلْ أَنتُم
مُّغْنُونَ عَنَّا مِنْ عَذَابِ ٱللَّهِ مِن شَىْءٍ ۚ قَالُوا۟
لَوْ هَدَىٰنَا ٱللَّهُ لَهَدَيْنَـٰكُمْ ۖ سَوَآءٌ عَلَيْنَآ
أَجَزِعْنَآ أَمْ صَبَرْنَا مَا لَنَا مِن مَّحِيصٍ ﴿٢١﴾

21. waxayna dadku u soo bixi Eebe markaasay ku dhihi kuwii «raaciyadda» ahaa kuwii madaxda ahaa anagu idinkaan idin raacaynay ee wax ma nooga taraysaan cadaabka Eebe, waxayna dhahaan hadduu Eebe na hanuuniyo waan idin hanuunin lahayn, waa isugu mid korkeenna haddaan argagaxno ama samirnno (adkaysanno) ma helayno fakasho.

وَقَالَ ٱلشَّيْطَـٰنُ لَمَّا قُضِىَ ٱلْأَمْرُ إِنَّ ٱللَّهَ
وَعَدَكُمْ وَعْدَ ٱلْحَقِّ وَوَعَدتُّكُمْ فَأَخْلَفْتُكُمْ ۖ
وَمَا كَانَ لِىَ عَلَيْكُم مِّن سُلْطَـٰنٍ إِلَّآ أَن دَعَوْتُكُمْ
فَٱسْتَجَبْتُمْ لِى ۖ فَلَا تَلُومُونِى وَلُومُوٓا۟
أَنفُسَكُم ۖ مَّآ أَنَا۠ بِمُصْرِخِكُمْ وَمَآ أَنتُم
بِمُصْرِخِىَّ ۖ إِنِّى كَفَرْتُ بِمَآ أَشْرَكْتُمُونِ
مِن قَبْلُ ۗ إِنَّ ٱلظَّـٰلِمِينَ لَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ ﴿٢٢﴾

22. wuxuuna dhahaa shaydaankii marka amarka la xukumo, Eebe wuxuu idiin yaboohay yabooh xaq ah anna waan idiin yaboohay waana idinku beeniyey, wax xujo ahna idinkuma lahayn oon ahayn inaan idiin yeedhay ood i maqasheen ee hay dagaalina ee dagaala naftiinna anuguna idiinma gargaari karo idinna iima gargaari kartaan, anugu waan diiday waxaa ila wadaajiseen horay daalimiintuna waxay mudan cadaab daran,

23. waxaana la gelin kuwii rumeeyey xaqa oo camal fiican falay Jannooyin ay socoto dhexdeeda wabiyadii iyagoo ku dhex waari idanka Eebe dartiis soo dhawayskooduna dhexdeeda waa salaan.

وَأُدْخِلَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ وَعَمِلُوا۟ ٱلصَّٰلِحَٰتِ
جَنَّٰتٍ تَجْرِى مِن تَحْتِهَا ٱلْأَنْهَٰرُ خَٰلِدِينَ
فِيهَا بِإِذْنِ رَبِّهِمْ ۖ تَحِيَّتُهُمْ فِيهَا سَلَٰمٌ ﴿٢٣﴾

Dadkoo dhan Eebey hor imaan Qiyaamada, waxaana is dagaali oo murmi Madaxdii xumayd iyo raaciyaddoodii oo ay raaciyaduu dhihi idinkaa na dhumiyey ee wax ma noo taraysaan, iyana ugu jawaabi inayan waxba u tarayn, hadday argagaxaan iyo hadday adkaystaanna isku mid tahay wax u gargaarina ayan helayn, waxaana la xidhiidhiyey iyaga iyo shaydaan oo isna marka dadka la kala xukumo u sheegi kuwuu dhumiyey in Eebe dhabta u sheegay isna been u sheegay wax xooga ama xujo ahna uusan u haysan saasna warkiisii ku maqleen, ee haysdagaaleen iyagu ee yeyna dagaalin isaga waxna isuma tari karaan, wuuna kaga baxay warkoodii, gaalna cadaab daran baa u sugnaaday, mu‘miniintana waxaa la gelin jannooyin khayr ku dhanyahay ay ku waari dhexdeedana ay salaan iyo Nabadgalyo kala kulmi. saasayna u muuqataa sidayisudagaaliisunacanaanan Madaxdiidhumisaydadkeedaiyodadkeeydhumiyeen,iyo siduu shaydaan khudub ugu akhrin kuwuu dhumiyey. Shacbi wuxuu yidhi: Wuxuu ka khudbayn Qiyaamada dadka hortooda. saas darteed waa inaan cidna lagu raacin xumaan laga digtoonaado Shaydaanka Jinniga iyo kan insigaba,Eebana aan lagaa dhex marin si aad u liibaanto. Ibraahiim (19-23).

24. ma ogtahay sida Eebe ugu yeelay Tusaale kalimada (Erayga) Fiican sida Geed wanaagsan oo xididadeedii dhulka ku suganyihiin laamaheediina samada (kor jiraan).

أَلَمْ تَرَ كَيْفَ ضَرَبَ ٱللَّهُ مَثَلًا كَلِمَةً طَيِّبَةً
كَشَجَرَةٍ طَيِّبَةٍ أَصْلُهَا ثَابِتٌ وَفَرْعُهَا
فِى ٱلسَّمَآءِ ﴿٢٤﴾

25. oo siisa (Bixisa) Cunnadeeda Waqti kasta idanka Eebaheed dartiis, wuuna u yeelaa Eebe tusaalayaal Dadka inay waantoomaan.

تُؤْتِىٓ أُكُلَهَا كُلَّ حِينٍۭ بِإِذْنِ رَبِّهَا ۗ وَيَضْرِبُ
ٱللَّهُ ٱلْأَمْثَالَ لِلنَّاسِ لَعَلَّهُمْ يَتَذَكَّرُونَ ﴿٢٥﴾

26. Kalimada (Erayga) xunna (Gaalnimada iyo xumaanta) waxay la mid tahay geed xun lagana rujiyey dhulka korkiisa oon sugnaan lahayn.

وَمَثَلُ كَلِمَةٍ خَبِيثَةٍ كَشَجَرَةٍ خَبِيثَةٍ ٱجْتُثَّتْ
مِن فَوْقِ ٱلْأَرْضِ مَا لَهَا مِن قَرَارٍ ﴿٢٦﴾

27. wuxuu ku sugaa Eebe kuwa rumeeyey xaqa Erayga sugan(ashahaadada iyo xaqa) Nolosha adduun iyo Aakhiraba wuxuuna dhumiyaa daalimiinta, wuxuuna falaa Eebe wuxuu doono.

يُثَبِّتُ ٱللَّهُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ بِٱلْقَوْلِ ٱلثَّابِتِ
فِى ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا وَفِى ٱلْءَاخِرَةِ ۖ وَيُضِلُّ ٱللَّهُ
ٱلظَّٰلِمِينَ ۚ وَيَفْعَلُ ٱللَّهُ مَا يَشَآءُ ﴿٢٧﴾

28. ma ogtahay kuwa ku badelay Nicmaddii Eebe Gaalnimo, Dejiyeyna qoomkoodii guri halaag.

۞ أَلَمْ تَرَ إِلَى ٱلَّذِينَ بَدَّلُوا۟ نِعْمَتَ ٱللَّهِ كُفْرًا
وَأَحَلُّوا۟ قَوْمَهُمْ دَارَ ٱلْبَوَارِ ﴿٢٨﴾

29. Jahannamayna gali meel lagu sugnaadana iyadaa u xun (Jahannamo).

جَهَنَّمَ يَصْلَوْنَهَا ۖ وَبِئْسَ ٱلْقَرَارُ ﴿٢٩﴾

30. waxayna u yeeleen Eebe shariig inay ka dhumiyaan jidkiisa, waxaad dhahdaa raaxaysta ahaanshihiinnu waa Naare.

وَجَعَلُوا۟ لِلَّهِ أَندَادًا لِّيُضِلُّوا۟ عَن سَبِيلِهِۦ ۗ قُلْ
تَمَتَّعُوا۟ فَإِنَّ مَصِيرَكُمْ إِلَى ٱلنَّارِ ٣٠

Hadal fiican iyo xaqu wuxuu la mid yahay geed fiican oo midho badan waqti kastana cunno laga helo, tan xunna waxay la mid tahay geed xun oon sugnayn waxna laga helayn, hadalka fiicanna waxaa u horreeya ashahaadada waxaana soo raaca hadal kasta oo khayra, kan xunna waa gaalnimo iyo dambi iyo dhib muslim, Eebana wuxuu Mu‘miniinta ku sugaa Adduun iyo aakhiraba hadalka sugan ee xaqa ah, waxaana Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) ka Sugnaaday Xadiithyo badan oo ka warrami su‘aasha qabriga iyo sida Mu‘minka Eebe u waafajin xaqa una dhihi Eebahay waa Ilaahay, Diintaydu waa Islaam, Nabigaygu waa Muxammed, markaas loo Nicmayn, Daalimiintase wuu dhumiyaa oo gafsiiyaa xaqa illeen iyagaa ka jeedsadaye, Eebana wuxuu doono yuu falaa, wax ka xun ma jiro kuwa ku badasha Nicmada xaqa iyo Wanaagga gaalnimo iyo xaq diiddo, Dadkoodiina dejiya una horseeda guri halaag iyo Jab, iyo Jahannamo iyo meel daran, una yeela Eebe shurako iyo wax lala caabudo xaq darrana arrinkiisa lagu raaco, Ibnu cabbaas wuxuu yidhi:
Gaaladoo dhan yaa loola jeedaa oo Eebe wuxuu ku soo diray Nabiga Muxamada Naxariis iyo Nicmo, ciddii ogolaatana oo ku mahdisa Eebana Jannay mudan, tii diidana ciqaabay mudan iyo cadaab. Cumar Binu Khadhaab waxaa laga wariyey: Waa labadii dambiilayaal ee Qureesh Binu Muqiira iyo Binuu Umaya, Binu Muqiirase waxaa la halaagay Maalintii Badar, Binu Umayase waxaa loo raaxeeyey muddo. Ibraahiim (24-30).

---

31. ku dheh addoomadayda rumeeyey (Xaqa) ha oogeen salaadda hana ka Nafaqeeyeyeen waxaan ku arzaaqay qarsoodi iyo muuqba ka hor imaatin Maalin aan gadasho iyo saaxiib jirin (qiyaamada).

قُل لِّعِبَادِىَ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ يُقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ وَيُنفِقُوا۟
مِمَّا رَزَقْنَٰهُمْ سِرًّا وَعَلَانِيَةً مِّن قَبْلِ أَن يَأْتِىَ يَوْمٌ
لَّا بَيْعٌ فِيهِ وَلَا خِلَٰلٌ ٣١

32. Eebe waa kan Abuuray samooyinka iyo dhulka kana soo dejiyey samada Biyo kuna soo bixiyey midho rizqigiinna dartiis, idiinna sakhiray doonta inay ku socoto badda amarka Eebe idiinna sakhiray Wabiyada.

ٱللَّهُ ٱلَّذِى خَلَقَ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضَ وَأَنزَلَ
مِنَ ٱلسَّمَآءِ مَآءً فَأَخْرَجَ بِهِۦ مِنَ ٱلثَّمَرَٰتِ
رِزْقًا لَّكُمْ ۖ وَسَخَّرَ لَكُمُ ٱلْفُلْكَ لِتَجْرِىَ
فِى ٱلْبَحْرِ بِأَمْرِهِۦ ۖ وَسَخَّرَ لَكُمُ ٱلْأَنْهَٰرَ ٣٢

33. idiinkuna sakhiray Qorraxda iyo Dayaxa si joogta ah idiinna sakhiray habeenka iyo Maalinta.

وَسَخَّرَ لَكُمُ ٱلشَّمْسَ وَٱلْقَمَرَ دَآئِبَيْنِ ۖ
وَسَخَّرَ لَكُمُ ٱلَّيْلَ وَٱلنَّهَارَ ٣٣

34. idinkana siiyey wax kastood warsataan, haddaad tirisaanna Nicmada Eebana ma koobi Kartaan, dadse waa dulmi badane gaalnimo badan.

وَءَاتَىٰكُم مِّن كُلِّ مَا سَأَلْتُمُوهُ ۚ وَإِن تَعُدُّوا۟
نِعْمَتَ ٱللَّهِ لَا تُحْصُوهَآ ۗ إِنَّ ٱلْإِنسَٰنَ لَظَلُومٌ
كَفَّارٌ ٣٤

35. xusuusta markuu Nabi Ibraahim yidhi Eebow ka yeel baladkan (Maka) Aamin igana dheeree ani iyo caruurtayda inaan caabudno Sanamyada.

وَإِذْ قَالَ إِبْرَٰهِيمُ رَبِّ ٱجْعَلْ هَٰذَا ٱلْبَلَدَ ءَامِنًا
وَٱجْنُبْنِى وَبَنِىَّ أَن نَّعْبُدَ ٱلْأَصْنَامَ ٣٥

36. Eebow waxay dhumiyeen wax badan oo ciddii i raacdana waa iga mid tii i caasidana adaa dambi dhaafe naxariista ah.

رَبِّ إِنَّهُنَّ أَضْلَلْنَ كَثِيرًا مِّنَ ٱلنَّاسِ ۖ فَمَن تَبِعَنِى فَإِنَّهُۥ
مِنِّى ۖ وَمَنْ عَصَانِى فَإِنَّكَ غَفُورٌ رَّحِيمٌ ﴿٣٦﴾

Eebe wuxuu faray Addoomadiisa daacadiisa, Salaad, wax bixin qarsoodi iyo muuqba Qiyaamaha ka hor illeen wax gadasho, Ganacsi iyo saaxiibtinimo ma jirtee, Eebaha mudan cibaadadaasna waa kan abuuray Cirka iyo Dhulka kana soo dejiyey cirka Biyo cunno soo saara, una sahlay dadka markabka, Qorraxda, Dayaxa, Wabiyada, Habeenka iyo Maalinta iyo wax kastooy u baahanyihiin, siiyana addoomadiisa waxay warsadaan, Nicmada Eebe ee xaq rumeyn, Caafimaad, caqli, cilmi, rizqi iyo kuwo kale ee badan lehna wax tiro lagu koobi karo ma aha ee waxaa loo baahanyahay in lagu mahdiyo Eebe daacadiisa, wanaagga iyo khayrna loogu dhaqmo, illeen caadada dadka waxaa ka mida dulmi iyo xaqdiidnimo. Aayadaha dambe waxay ka warrami in Nabi Ibraahim Eebe ka baryey inuu Maka ka yeelo balad Aamina kana fogeeyo isaga iyo Caruurtiisaba inay sanam caabudaan illeen dad badanbaa ku dhumaye, in Nicmada Eebe lagu shugriyana waa Waajib. Abii Dardaa waxaa laga wariyey: Ruuxaan Aqoonsan Nicmada Eebe korkiisa Cunno iyo cabbid mooyee waxaa yaraaday Camalkiisa waxaana soo dhawaaday cadaabkiisa. Camal fiican, dad anfac, xaq u yeedhid iyo wanaag yaa lagu mutaa gudashada shugriga Eebe. Ibraahiim (31-36).

---

37. Eebow waxaan dejiyey caruurtaydii (Qaar) tog aan beer lahayna oo ah Baydkaaga sharafta leh agtiisa Eebow inay Oogaan salaadda ee ka yeel Quluubta dadka tii u iilata xaggooda kuna arzaaq midho inay shugriyaan.

رَّبَّنَآ إِنِّىٓ أَسْكَنتُ مِن ذُرِّيَّتِى بِوَادٍ غَيْرِ ذِى زَرْعٍ
عِندَ بَيْتِكَ ٱلْمُحَرَّمِ رَبَّنَا لِيُقِيمُوا۟ ٱلصَّلَوٰةَ
فَٱجْعَلْ أَفْـِٔدَةً مِّنَ ٱلنَّاسِ تَهْوِىٓ إِلَيْهِمْ
وَٱرْزُقْهُم مِّنَ ٱلثَّمَرَٰتِ لَعَلَّهُمْ يَشْكُرُونَ ﴿٣٧﴾

38. Eebow adugu waxaad ogtahay waxaannu qarin iyo waxaannu Muujin, kamana Qarsoona Eebe waxba samada iyo dhulka (midna).

رَبَّنَآ إِنَّكَ تَعْلَمُ مَا نُخْفِى وَمَا نُعْلِنُ ۗ وَمَا يَخْفَىٰ عَلَى ٱللَّهِ
مِن شَىْءٍ فِى ٱلْأَرْضِ وَلَا فِى ٱلسَّمَآءِ ﴿٣٨﴾

39. mahad Eebaa iska leh ee ah kan i siiyey anoo wayn Ismaaciil iyo Isxaaq Eebahayna waa maqlaha baryada (ajiibe).

ٱلْحَمْدُ لِلَّهِ ٱلَّذِى وَهَبَ لِى عَلَى ٱلْكِبَرِ إِسْمَٰعِيلَ
وَإِسْحَٰقَ ۚ إِنَّ رَبِّى لَسَمِيعُ ٱلدُّعَآءِ ﴿٣٩﴾

40. Eebow iga yeel mid ooga salaadda aniga iyo caruurtayda Eebow Aqbal baryadayda.

رَبِّ ٱجْعَلْنِى مُقِيمَ ٱلصَّلَوٰةِ وَمِن ذُرِّيَّتِى ۚ
رَبَّنَا وَتَقَبَّلْ دُعَآءِ ﴿٤٠﴾

41. Eebow ii dambi dhaaf ani iyo Labadaydii Waalid iyo Mu‘miniinta Maalinta ay kici xisaabtu (Qiyaamadu).

رَبَّنَا ٱغْفِرْ لِى وَلِوَٰلِدَىَّ وَلِلْمُؤْمِنِينَ يَوْمَ يَقُومُ
ٱلْحِسَابُ ﴿٤١﴾

42. ha u malayn in Eebe halmaansanyahay waxay fali daalimiintu, wuxuu uun dib ugu dhigi maalin ay taagmi dhexdiisa indhuhu.

وَلَا تَحْسَبَنَّ ٱللَّهَ غَٰفِلًا عَمَّا يَعْمَلُ
ٱلظَّٰلِمُونَ ۚ إِنَّمَا يُؤَخِّرُهُمْ لِيَوْمٍ تَشْخَصُ
فِيهِ ٱلْأَبْصَٰرُ ﴿٤٢﴾

43. oyna deg degi oo madax kor yeeli oosan soo noqonayn aragoodu (taagmi indhuhu) Quluubtooduna oy madhantahay «cabsi darteed».

مُهْطِعِينَ مُقْنِعِى رُءُوسِهِمْ لَا يَرْتَدُّ إِلَيْهِمْ طَرْفُهُمْ ۖ
وَأَفْـِٔدَتُهُمْ هَوَآءٌ ﴿٤٣﴾

Aayadaha hore waxay aad ula xidhiidhaan Aayadihii ka horreeyey, wuxuuna Nabi Ibraahim Eebe ka baryey inuu quluubta dadka u soo jeediyo xagga baydkiisa uu ag dejiyey Caruurtiis isagoon beer la hayn, wuxuuna ka baryey inuu ku arzaaqo midho si ay cibaadada u gutaan kuuguna shugriyaan, Eebana waa ka aqbalay oo waxaa muuqda in Maka balad Nicmo tahay, waxaase loo baahanyahay camal fiican mahad Eebe iyo isu Naxariisasho, Nabi Ibraahim wuxuu isu bandhigay Eebe oo uu yidhi adaa og wax kasta wax kaa qarsoonna ma jiro, wuuna ku mahdiyey Eebaha siiyey Ismaaciil iyo Isxaaq isagoo wayn, illeen Eebaa ducada aqbalee, wuxuuna Eebe ka baryey inuu ka yeelo mid daa’ima gudashada salaadda isaga iyo caruurtiisa ducadana ka aqbalo, una dambi dhaafo isaga, Waalidiintiis, iyo Mu‘miniintaba Maalinta lays xisaabin qiyaamada, maxaa ka cajab badan Nabi Ibraahim iyo Naxariistiisa iyo Xaalkiisa, tan kale Eebe ma halmaansana daalimiintu waxay fali wuxuu dib ugu dhigi Maalin Indhuhu taagmi Qiyaamada, oo cabsi badan Quluubtuna gilgilan cabsidarteed, dhibka qiyaame iyo culayska iyo waxyaalaha ku sugan waa wax Eebe laga magan galo loona darbado lana feejignaado, allaha sahlo. Ibraahiim (37-43).

---

44. uga dig dadka maalintuu u iman cadaab oy odhan kuwii dulmi falay eebow dib noogu dhig muddo dhaw aan ajiibno yeedhidaadee oon raacno rasuuladee, miyeydaan ahayn kuwii ku dhaartay horay inaydaan tegayn.

وَأَنذِرِ ٱلنَّاسَ يَوْمَ يَأْتِيهِمُ ٱلْعَذَابُ فَيَقُولُ ٱلَّذِينَ
ظَلَمُوا۟ رَبَّنَآ أَخِّرْنَآ إِلَىٰٓ أَجَلٍ قَرِيبٍ نُّجِبْ دَعْوَتَكَ
وَنَتَّبِعِ ٱلرُّسُلَ ۗ أَوَلَمْ تَكُونُوٓا۟ أَقْسَمْتُم
مِّن قَبْلُ مَا لَكُم مِّن زَوَالٍ ﴿٤٤﴾

45. oo degteen guryihii kuwii dulmiyey naftooda oo idiin caddaaday sidaan ku fallay iyagii oon idiin yeellay tusaalayaal.

وَسَكَنتُمْ فِى مَسَٰكِنِ ٱلَّذِينَ ظَلَمُوٓا۟
أَنفُسَهُمْ وَتَبَيَّنَ لَكُمْ كَيْفَ فَعَلْنَا بِهِمْ
وَضَرَبْنَا لَكُمُ ٱلْأَمْثَالَ ﴿٤٥﴾

46. iyagoo dhagar samayn Eebe agtiisaana Abaalka dhagartoodu yahay, dhagartooduna ma aha mid la suulaan (tagaan) Buuruhu.

وَقَدْ مَكَرُوا۟ مَكْرَهُمْ وَعِندَ ٱللَّهِ مَكْرُهُمْ
وَإِن كَانَ مَكْرُهُمْ لِتَزُولَ مِنْهُ ٱلْجِبَالُ ﴿٤٦﴾

47. ee ha u malayn in Eebe baajin u yabooha Rasuulladiisa illeen Ilaahay waa adkaade aarsadee.

فَلَا تَحْسَبَنَّ ٱللَّهَ مُخْلِفَ وَعْدِهِۦ رُسُلَهُۥٓ ۚ
إِنَّ ٱللَّهَ عَزِيزٌ ذُو ٱنتِقَامٍ ﴿٤٧﴾

48. Maalin Buuna (oofin) lagu bedeli dhulka Dhul kale iyo Samooyinkaba, waxaana loo soo bixi Eebaha kalida ah ee awoodda sara leh.

يَوْمَ تُبَدَّلُ ٱلْأَرْضُ غَيْرَ ٱلْأَرْضِ وَٱلسَّمَٰوَٰتُ ۖ وَبَرَزُوا۟ لِلَّهِ ٱلْوَٰحِدِ ٱلْقَهَّارِ ﴿٤٨﴾

Eebe wuxuu faray Nabiga (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuu uga digo dadka cadaab daran ka hor intayan warsan in dib loo dhigo muddo yar si ay u maqlaan xaqa Rasuuladana u raacaan, waxayse horay ugu dhaarteen inayan ka guurayn adduunka, iyagoo waliba degay guryihii kuwii ka horreeyey ee daalimiinta ahaa ee la halaagay, una cadaatay sida Eebe ku falay, hadana gaaladu dhagar iyo khiyaanad kama daayaan xaqa iyo Mu'miniinta, inkastoon dhagartoodu buuro jajabinayn, oyse u dhawdahay, Eebana baajinmaayo ballan qaadkiisii ahaa inuu Rasuullada u gargaari, waana adkaade aarsada Maalin dhulka iyo cirka lagu badali dhul kale iyo cir kale, dhammaan dadkuna u soo bixi Eebaha kalida ah ee awoodda sare, waana maalinta Qiyaame. Waxaa Bukhaari iyo Muslim ku sugnaaday in dadka lagu soo kulmin maalinta Qiyaame dhul cad oo nadiifa oon cidna calaamo ku lahayn, siduu Nabigu yidhi (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Eebase wuu u Naxariisan Mu'miniinta xaqa raacay ee si dhab ah u caabudday, wuxuuna ciqaabi xaq diidayaasha Gaalada ah ee khayaamada, dhagarta, dhuminta iyo xumaanoo dhan u maleegi xaqa iyo Islaamka, adduunkase waa in lagu dulleeyo gacmaha muslimiinta, Aakhirana waa inay la kulmaan wax madaxooda ka wayn oo ciqaab iyo dulli ah. Ibraahiim (44-48).

---

49. Waxaadna arkaysaa Danbiilayaashii oo Maalintaas lagu xidhiidhiyay (lays kulaxidhay) Biro (Naareed).

وَتَرَى ٱلْمُجْرِمِينَ يَوْمَئِذٍ مُّقَرَّنِينَ فِى ٱلْأَصْفَادِ ﴿٤٩﴾

50. Dharkooduna (Qamiisyadoodu) waa Daamur (Naara) waxaana dabooli wajigooda naar.

سَرَابِيلُهُم مِّن قَطِرَانٍ وَتَغْشَىٰ وُجُوهَهُمُ ٱلنَّارُ ﴿٥٠﴾

51. inuu ka Abaal mariyo Eebe naf kasta Waxay kasbatay, Eebana way deg degtaa xisaabtiisu.

لِيَجْزِىَ ٱللَّهُ كُلَّ نَفْسٍ مَّا كَسَبَتْ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ سَرِيعُ ٱلْحِسَابِ ﴿٥١﴾

52. Quraankana waa gaadhsiin Dadka iyo in Loogu Digo iyo inay ogaadaan in Eebe Ilaah Kaliya uun Yahay, iyo inay waantooto Cidda Caqliga leh (Mu'miniinta).

هَٰذَا بَلَٰغٌ لِّلنَّاسِ وَلِيُنذَرُوا۟ بِهِۦ وَلِيَعْلَمُوٓا۟ أَنَّمَا هُوَ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ وَلِيَذَّكَّرَ أُو۟لُوا۟ ٱلْأَلْبَٰبِ ﴿٥٢﴾

Eebe cidna ma dulmiyo ee dadku iyagaa Naftooda Dulmiya, Maalinta xisaabta ee Qiyaamana Cid walba waxaa laga abaal marin Camalkeeda, Waxaana Danbiilayaasha Gaaloobay la isugu xidhxidhi kooxo iyo labo iyagoo loo xidhi Dhar Naara wajigoodana Naaru dabooli,Taasina waa in Eebe ka abaal marin Ruux kasta wuxuu kasbaday, oy Eebana deg degto Xisaabtiisu, Quraankuna waa xaq Iyo war Dhab ah oo cad Kana soo fulay Xaakimka awoodda badan ee wax kasta ku hoos jiraan, Ilaaheenna wayn,lana gaadhsiin Adduunka iyo Dadkoo Dhan, si Loogu digo, iyo inay Ogaadaan in Eebe ilaah kaliya yahay oy kuna waano qaataan kuwa Caqliga leh. Taasina waxay ku tusin in Dambiilayaasha la abaal marin, in Quraanku iyo Diinta islaamku Caalami Yahay'dadkoo dhanna ay Waajib ku tahay Rumayntiisu, Raacidiisa, ku dhaqankiisa, ugu yeedhidda Dadka, Ogaansho inuu u suubado wakhti kasta, in wanaag ku dhan yahay, inuu yahay jidkii Jannada iyo Liibaan adduun iyo Aakhiroba. Ibraahiim (49-52).